



HAGE LOOGUTALAGALAY DARYEELKA WAAYEELKA MAGAALADA STOCKHOLM



Mid ka mid ah waajibaadyada ugu muhiimsan ee magaalada waa inay xaqiijiso in waayeelka Stockholm helaan adeegyo, xanaanayn iyo daryeel tayo sare leh oo wata xorriyad doorasho. Xog-waydiin la sameeyay waxaa lagu ogaaday in badi dadka waayeelka ah ee Stockholm ku nool ay ku qanacsan yihiin daryeelka ay helaan. Qanciddu waxay kor u kacaysay sannad walba laga bilaabo 2007, waxa ay aadka u jeclaysteen waxay tahay sida shaqaalaha daryeelku ula dhaqmaan. Waxaa cadayn dheeriya ah inaan jidka toosan ku socono u magacaabidda Stockholm loo magacaabay Degmada Tayada Sweden ee 2009 (Sweden's Quality Municipality 2009), daryeelka waayeelkana si gaar ah ayay gudigu carabka ugu dhufteen. Dadaalka horumarinta daryeelka waayeelkuna waa sii socdaa. Qorshaha daryeelka waayeelka ee Magaalada Stockholm waxuu dajinaya hadafyo iyo waxyaabo fiiro gaara loo yeesho, waxuuna adkaynayaa sidii sharafta iyo ixtiraamka ay marwalba u noqon lahayeen saldhigga laga duulayo. Hadafka fog waa in la abuurto nidaam daryeel waayeel oo caalami ah oo ay ku farxi karaan dadka reer Stockholm. Ujeedada hagehanti waa inuu kuu sheego waxaan bixin karno iyo waxa laga fili karo adeegga waayeelka ee Stockholm dhexdeeda.

HADAFYADA DARYEELKA WAAYEELKA EE MAGAALADA STOCKHOLM

Daryeelka Waayeelka ee Magaalada Stockholm waxay noqon doontaa mid lagu yaqaano tayo sare, qofka si gaar ah u taabanaysa oo aamin ah. Nooca doorashada caawinada la bixiyo waxaa saldhig u noqon doonaa xaqa doorasho. Sharafta iyo ixtiraamku waxay noqon doonaan halka laga duulayo si uu shaqsi walba nooloshu uu rabo ugu noolaado.



Ewa Samuelsson
Ewa Samuelsson
(Duq-ku-xigeenka,
Waxda Waayeelka)



Irene Svenonius
Irene Svenonius
(Xoghayaha Fulinta
Magaalada Stockholm)

DARYEELKA WAAYEELKA EE MAGAALADA STOCKHOLM

Wakhtigan xaadirka ah, in ka badan 125,000 oo reer Stockholm ah ayaa jira 65 ama ka wayn. Shantii qof hal ka mid ah oo kaliya ayaa hela daryeelka waayeelka. 42,000 oo reer Stockholm ah ayaa ka wayn 80 sano, oo nuskood ayaa hela daryeel waayeel.

Badi dadka adeegga daryeel hela, oo saddex-meelood laba ah, wali waxay ku noolyahiin gurigooda, waxayna daryeelkooda ku helaan nooc adeegyo daryeel ee guriga lagu sameeyo ama waxqabadyo maalintii. 2,500 waxay ku noolyahiin guryo adeegyo loo sameeyay iyo 6,000 oo ku nool guryaha xanaanada iyo daryeelka.

Samaynta horumar wanaagsan

Dad badan ayaa dooranaya cidda bixinaysa daryeelkooda ama guriyayntooda. Xog-waydiin 2009 laga sameeyay dadka adeegga isticmaala, 64 boqolkiiba waxay ku jawaabeen inay awoodeen inay iyagu gurigooda doortaan ama iyaga iyo qaraabadood wada doortaan. Nus ka mid ah dadka adeegga daryeelka guriga doortay, waxay doorteen daryeelka ay shirkadaha madaxa-banaan bixiyaan. Xog-waydiisku waxuu sidoo kale helay in dadka isticmaala adeegyadu ay ka sii raali noqonayaan daryeelka waayeelka ee magaaladu bixiso. Sanadkii 2009, 80 boqolkiiba waxay ku qanceen daryeelkooda xanaanada ama daryeelka ay guriga ku helaan.

Xoriyadda doorasho!

Si ay u awoodaan oo loogu sahlo in dadka waayeelka ah doortaan xanaanadooda, magaaladu waxay bixinaysaa doorashooyin balaaran. Laga bilaabo 2002, adeegyada daryeelka guryaha, adeegga wehelka, daryeelka lagu nasiyo dadka qof xanaaneeya ayaa waxaa bixinayay dowladda hoose iyo shirkado madaxbanaan. Xaquuqda doorasho ee guryaha xanaanada iyo daryeelka waxaa la dhaqangaliyay 1 July 2008. Sannadkii 2009, xaquuqda waxaa lagu daray nashaadaadka maalintii.

Stockholm waa diyaar!

Tobanka sano ee soo socda waxaa la filayaa inay magaalada ku soo kordhaan 90,000 qof. Saddexdii qof mid ahaan dadka Stockholm waxuu noqon doonaa 65-79 sanno.



Dadaalka lagu horumarinayo daryeelka waayeelka ee Stockholm waa socdaa. Sannadkii 2010, horumarinta tayadu waxay fiiri gaar ah siisay qiimaynta taageerada iyo adeegyada daryeelka guriga. Si aan u fulino hadafkayaga ah inaan bixino guryo si fiican loo habeeyay, oo ammaan ah, balaayiin Kronor oo maalgalin ah oo loo yaqaan Äldrelyftet – Haddii la turjumana ah “kor u qaadka waayeelka” – ayaa la samaynayaa si sare loogu qaado heerka guriyaynta waayeelka magaalada.

Nooc cusub oo guriyo ah oo loo yaqaano hoyga amaanka ah ayaa la bilaabay 2010. Dadka degan waxay helayaan alarmiga ammaanka, shaqaale, nashaadaad la wadaago, goobaha bulshada iyo fursadda wax-wada-cunka wakhtiyada cunada. Hoy amaan ah ayaa la siiyaa dadka gaaray 75 iyo ka wayn. Hoyada dadka da’da wayn hore ayay u haysteen. Labadaan doorasho midkoodna go’aan caawino ah uma baahna.

Si loo sii hormariyo hawlaha magaalada ee ka hortagga ah, booqashooyin guri ayaa la siinayaa qof walba oo 75 iyo ka wayn gaaray oo aan helin adeegyada daryeel.

WAXQABADKA TAYADA EE MAGAALDA STOCKHOLM

Siyaasadda tayada ee Magaalada Stockholm waxay isku taxalujinaysaa inay caddayso waxa loo qaban karo dadka Stockholm ku nool, sidii loo gaari lahaa iyo sidii daryeelka waayeelka loo sii dabagali lahaa oo loo horumarin lahaa.

Waad dooran kartaa

Waayeel walba oo Stockholm ku nool waa inuu helo doorashooyin balaaran oo dhanka guriyaynta, adeegyada daryeelka guriga, adeegga wehelka, daryeelka lagu nasiyo dadka qof xanaaneeya iyo adeegyo kale. Sidaa darteed magaaladu waxay isku higsanaysaa inay dhiirgaliso doorashooyin kala duwan.

Siinta fiiro gaara tayada

Damaana-qaadkayaga tayadu waxuu yahay in kuwa daryeelka helayaa ay ogaadaan in isagu/iyadu xaq u leedahay xanaanada iyo adeegyada daryeelka. Sahal ayay noqondoontaa in laga cawdo waxii gaabin ah iyo in wax laga qabto. Dagmo walba waxay mas'uul ka tahay inay xaqiijiso in xarun walba oo daryeelka waayeelka ah ay bixinayso damaanoqaad tayo.

Haddii xanaanada iyo daryeelka ay bixinayso dowladda hoose ama shirkad madaxbanaan, lacagta ku baxaysaa waxay noqonaysaa mid isku mid ah. Taas micnaheedu waxuu yahay adeegyada isku midka ah isku si loo bixin doono.

Dabagalka magaalada

Si loo ilaaliyo tayada, Magaalada Stockholm waxay ka dalbaysaa shirkadaha inay adeegyadooda ku bixiyaan nidaamka doorashada xorta ah, sida ay dowladda hoose u bixinayso. Golaha degmooyinku waxay samayndoonaan dabagal sanadle ah. Tusaale ahaan, dadka daryeelka hela waxay ra'yigooda ka dhiiban karaan tayada daryeelka waayeelka, iyagoo adeegsanaya xog-waydiiska isticmaalayaasha.

Hoyga daryeelka waayeelka, adeegyada daryeelka guriyaha dhexdooda iyo waxqabadyada kale ayaa waxaa eegaya baarayaasha daryeelka waayeelka iyo baarayaasha magaalada. Tani waxay gacan ka gaysanaysaa in daryeelka iyo xanaanada magaaladu si joogto ah u horumaro. Wakiilka Waayeelka (The Ombudsman for the Elderly) waxuu sidoo kale qori doonaa warbixin sannadle ah.

Maalmo micno leh

In kabadan 100 qof oo xanaanada iyo daryeelka Sabbatsbergsbyn ku nool ayaa badidood waxay qabaan dementia (jirrada hilmaanka). Guriga waxaa gacanta ku haya Stockholms Äldreboende AB, waana mid kamid ah hadafka shirkada in laga dhigo maalmaha dadka guriga ku nool kuwo micno leh. Waa midaa darteed sababta ay u sameeyeen martigaliso iyo maamule nashaadka. Waxaa mudan halka uu kuyaal oo daris la ah Vasa Park oo leh beer loogu tala galay waayeelka, waxay leedahay fursado badan oo banaanka lagu qaato, laguna raaxaysto dabecadda bartamaha magaalada.



NOOCYO DARYEEL OO KALA DUWAN

Taageero iyo caawino guriga dhexdiisa

Inta badan dadka waayeelka ah waxay jecel yihiin inay gurigooda ku noolaadaan ilaa inta ay ammaan ku dareemi karaan. Adeegyada daryeelka guriga dhexdiisa iyo caawiyeyaasha farsamo ayaa suurto galinaya inuu dheeraado waqtiga ay dadku kusii noolaan karaan gurigooda. Adeegyada guryaha waxaa lagu bixiyaa oo xukuma baahida qofka, waxayna isagu jiri karaan adeegyo iyo xanaano. Qofka daryeelka guriga la siinayo ayaa dooranaya cidda bixinaysa. Codsiga adeegyada daryeelka guriga dhexdiisa waxaa gacanta ku haya maamulka xaa-fadda magaalada.



Hawlaha daryeelka ee waayeelka gurigooda ku nool waxaa ka mid ah, nashaadaadyo, daryeelka lagu nasinayo qofkii waayeelka guriga ku hayay, adeega wehelinta iyo fursadda daryeelka waqtiga-gaaban. Laga bilaabo Febaraayo, 2010, waxaa suurto gal ah daryeel gaaban oo dalka dibadiisa ah.

Guriyaynta

Waxaa jira guryo kala duwan oo loogu talagalay dadka jira 65 iyo ka wayn. Go'aan in qofka la caawiyo ah ayaa qaarkood loo baahan yahay, halka guryo kale laga dhamaysto maamulka guriyaynta ee deegaanka ama cidda guriga leh. Noocyo kale oo hoy ah ayaa sidoo kale waxaa lagu helaa qaab ijaarte-gate (tenant-owner)

Guriyaynta dadka waaweyn, laga bilaabo 2010, hoy amaan ah ayaa loo helayaa oo loogu talagalay dadka

Neecow qabow

*Guriga xanaanada iyo daryeelka ee Mäl-
larbacken ee Bromma ku yaal si aad loo
habeeyay ayuu u maamulaa nashaadaadka
bulshada – oo banaan-u-baxu ugu horeeyo.
Tusaale ahaan, xagaa walba dadka degan
waxay ku safri karaan doon wheelchair leh
oo Mäl-
larbacken leedahay.*

waawayn ee aan daryeel badan iyo xanaano u baah-
nayn. Looma baahna in la gaaro go'aan caawin si
loo helo guryaha noocan ah. Guryaha adeegyada leh
waxaa heli kara dadka u baahan adeegyo iyo heer
ammaan oo sare. Guryaha xanaanada iyo daryeelka
waxaa loogu talagalay dadka waayeelka ah ee ubaahan
xanaanada iyo daryeelka dheeriga ah. Waxaa la helayaa
shaqaale 24 saac maalintii iyadoo xanaano weheliso.

Adeeg-caafimaad

Maamulka gobolka ayaa wakiil ka ah adeegga-
caafimaad, laakiin magaaladu waxay wakiil ka
tahay adeegga-caafimaad ee guryaha xanaanada iyo
daryeelka, guryaha adeegyada leh, nashaadaadka
maalintii iyo daryeelka mudada-gaaban. Si loo
xaqiijiyo in baahida dadka wax laga qabto magaa-
ladu waxay isku dayaysaa inay adeegga-caafimaad-
ka maamulka gobolka kala shaqayso. Sannadkii
2009, Magaalada Stockholm waxay go'aansatay
nidaam cusub oo ah in marka qofka waayeelka ah
uu isbitaalka ka baxayo ay qaataan caafimaad cad
iyo qoraal amaankooda ah.

Suurtagalnimada in uu qofku sugi karo hoyga uu doorto

Qofka loo oggolaaday in uu guri xanaano iyo daryeel waxuu dooran karaa adeegga ay dowladda hoose bixiso ama tan shirkadaha madax-banaan bixinaysa. Hadii halka uu dalbaday aanay meel ka banaanayn, waxaa suurto gal ah inay liiska sugidda ku jiraan ilaa sedex bilood, islamarkaana kusii noolaado guri xanaano ama guri daryeel oo kale.

SIDA DADKA WAAYEELKA AH WAX U ARKAAN

TOBANKII
QOF SAGAAL
KA MID AH WAY KU
QANACSAN
YIHIIN LA DHAQAN-
KOODA

Xog-waydiiska sannad walba la qaado ayaa lagu ogaan karaa sida dadka waayeelka ah ay daryeelkooda, xanaanayntooda iyo adeegooda ugu qanacsan yahiin. Jawaab bixintu waxay sheegaysaa in ku qanciddu marwalba sii kordhayso.

Xog-waydiiskii ugu danbeeyay, 81 boqolkiiba dadka helaya adeeg daryeel ama ku nool guryaha daryeelka iyo xanaanadu way ku qanceen daryeelka. Qancida dadka gurigooda daryeelka ku hela waxaa ku darsantay 2 dhibcood boqolkiiba, dadka guryaha daryeelka iyo xanaanada ku noolna 4 dhibcood, marka loo eego sanadkii hore. 71 boqolkiiba dadka guryaha adeegyada leh ku nool way qanceen - taas oo lamid ah tii sanidkii hore.



Dadka daryeelka helaya badankood waxay jeclaysteen sida shaqaalaha daryeelku ula dhaqmo. Halkan, qancidda dadka daryeelka helaya waxay ka siyaaday 90 boqolkiiba 2008, waxayna gaartay 92 boqolkiiba 2009.

Tusaalooyin kale oo wanaagga daryeelka waayeelka ee magaalada ka hadlaya waxaa laga heli karaa warbixinada baaritaanada iyo bilad sharafyada tayada Magaalada Stockholm ku guulaysatay.

HADAFYADA QANCINTA MACAAMIISHA

Magaalada Stockholm waxay dajisaa hadafyo lagu koontarooli karo hawlaha magaalada. Hadafyada soo socda ayaa la dajiyay si loo kordhiyo qancida adeegga dadka waayeelka ah:

- Adeegyada daryeelka iyo guryaha xanaanada iyo daryeelka, tirada dadka qanacsan waa inay ka badato 81 boqolkiiba oo ay marayso 2010, oo gaarto 83 boqolkiiba marka la gaaro 2012.
- Tirada qaraabada ku qanacsan adeegga qofkoodu helo waa inay ka badato 64 boqolkiiba oo ay 2010 marayso, oo gaarto 70 boqolkiiba sanadka 2013.
- Dadka daryeelka helaya sida ay amaankooda u arkaan marka ay gurigooda ku noolyahiin waa inay ka badato 78 boqolkiiba oo ay 2010 marayso, oo gaarto 82 boqolkiiba sanadka 2012. Tirada dadka ku nool guryaha xanaanada iyo daryeelku waa inay gaartaa 87 boqolkiiba ilaa 89 boqolkiiba.
- Cunada iyo waqtiyada cuno bixinta ee adeegga guryaha iyo kuwa dadka dagan wanaagga loo arko waa inay ka bato 73 boqolkiiba 2010, oo ay tiradan badato marka la gaaro 2013.

DAD AAD U BADAN AYAA KU SII QANCAYA GURYAHA XANAANADA IYO DARYEELKA

Xog-ururinta tayada daryeelka iyo xanaanada guryaha ee sanadlaha ah ee Magaalada Stockholm ayaa sheegaya in dad sii badanaya ay xaaladdooda ku qanacsan yihiin. Natijada baaritaanka waxaa lagu saleeyay su'aalo qoraal ahaan dadka lagu waydiiyay sanadkii 2010 oo laga qaaday 5,488 qof oo hela daryeelka guriga iyo kan guryaha xanaanada iyo daryeelka oo ay bixiyaan shirkado gaar ah ama dowlada. Waxaa kasoo jawaabay 2,625 qof oo dadka daggan ah. Nus ka mid ah dadka soo jawaabay waxay jireen 86 iyo ka wayn.

Shaqaalahu si wanaagsan ayay iila dhaqmaan



Shaqaalahu aad ayay u dabacsan yihiin oowaxayna iwaydiiyaan sida ay kaalmada u qaban lahaayeen




Hoygayga waan ku qanacsanahay




Hoygayga amaan ayaan ku ahay



Dhadhanka cunadu waa wanaagsan yahay




Banaanka waan u bixi karaa markii aan doono



0%

100%



CADDAYN DHEERI AH INAAN WADDADA TOOSAN HAYNO

Stockholm – Degmada Tayada 2009 ee Sweden

Carwada tayada ee lagu soo bandhigay Kvalitetsmänsan ee Gothenburg, Magaalada Stockholm waxaa lagu magacaabay degmada tayada 2009 ee Sweden, daryeelka waayeelka ayaana si gaar ah carabka gudigu ugu dhuftay. Gudiga waxaa ku jiray matalayaal ka socda Isutagga Maamulka Degmooyinka iyo Gobolada ee Sweden (Swedish Association of Local Authorities and Regions), Ururka xiriirka Ganacsiga ee Sweden (the Swedish Trade Union Confederation), Isutagga Xiriirka Xirfadlayaasha ee Sweden iyo Isutagga Xiriirka Shaqaalaha ee Sweden (Swedish Confederation for Professional Employees)

Guriga daryeelka ee Södermalm – waa la sharfay

Sanad walba Magaalada Stockholm waxay bixisaa abaalmarinta tayada waxqabadka. Sanadkii 2009 guriga daryeelka ee Södermalm waxaa sharfid lagu gudoonsiiyay dadaalkooda wakhtiyada cunada. Gudigu waxuu tilmaamay: “Qaybtu waxay isku taxalujisay inay ku dadaasho in ma-caamiishu helaan cuno nafaqo leh, in cunno cunku soo jiidasho leeyahay iyo inay kordhisay aqoonta shaqaalaha ee arimaha cunada iyo nafaqada”

Waxbarasho-udiridda (Scholarship) Sanadkan ee Vitalis

Laga soo bilaabo 2009, Dadka waaweelka ah iyo qaraabodoodu waxay daryeelkooda ka raadin karaan websaytka City of Stockholm. Sidaa awgeed, qofka alifay Care Diary (Xasuusqorka Daryeelka), Jenny Andersson, waxaa lagu abaal mariyay waxbarasho-u-diridda 2010 ee Vitalis Scholarship ee Dowladaha Hoose. Sanad walba ayaa la bixiyaa, waxbarasho-u-diriddan waxaa la gudoonsiiyaa wax ku soo kordhinta IT ay shaqaalaha xanaanada iyo daryeelku isticmaalaan.

Kooxda Hilmaanka (Dementia) ee Bromma – kooxda ugu adeega fiican daryeelka guriga ee 2009

Abaalmarinta waxaa bixiya Demensförbundet (the Dementia Association – ururka dementia) iyo Xarunta Dementia-da ee Sweden. Kooxda heeganka ah ee dementia-da ee adeega daryeel ee guryaha dowladda hoose, iyagoo taageero ka helaya isku-xirayaasha xaafadda ee dementia-da, waxay kor uqaadeen siyaabo awoodsiinaya dadka dementia-da qaba inay gurigooda joogaan iyagoo ismaamulaya inta ugu badan ee suurto galka ah.



TALO, TAAGEERO IYO HAGID

Su'aalo ma qabtaa, odhaah ama cabasho? Mise doonaysaa inaad waxbadan ka ogaato daryeelka waayeelka ee Magaalada Stockholm? Hoos waxaa ku yaala siyaabo aad si dhaqso leh u heli karto warbixinta iyo taageerada aad ubaahan tahay.

Äldre Direkt (Äldre-ka tooska ah)

Äldre Direkt – taleefoon warbixin oo toos ah, call 08-80 65 65 – waxuu ka jawaabayaa su'aalaha guud ee quseeya xoriyadda doorashada, talobixinta daryeelka waayeelka ee Magaalada Stockholm, waxay sidoo kale kugu hagi kartaa maamulka aad rabto, kuwa adeegyada bixiya ama qaybta aad u baahan tahay. Äldre Direkt waxaad sidoo kale kula xariiri kartaa e-mailka: aldredirekt.service@stockholm.se.



Hadii aad doonayso daryeel waayeel waxaad internetka kula xariiri kartaa “Gör en förfrågan om äldreomsorg” (Waydii daryeelka waayeelka), waxaana kula soo xariiraya sargaalka caawinta qaabilsan. Waxaad sidoo kale ku xisaabin kartaa qarashka baxaya.

Bogga uu ka bilowdo www.stockholm.se waxaa ku yaal Find & Compare service (hel oo isbarbardhig) oo aad ka heli karto oo isku barbardhigi kartid bixiyayaasha daryeelka waayeelka.

Ombudsman for the Elderly (Wakiilka Waayeelka)

Wakiilka Waayeelka ee Magaalada Stockholm waxaa xor waana ka madaxbanaan yahay maamulka magaalada. Waxay is ku dayayaan inay xoojiyaan saamaynta dadka iyo ka qaybqaadashada daryeelka waayeelka iyagoo soo gudbinaya faalo, rabitaano iyo cabashooyin. Dhammaan faalada uu Ombudsman helo waa muhiim waxayna waxka tarayaan horumarinta iyo kobcinta daryeelka waayeelka ee magaalada.

E-mail: aldreombudsmannen@stockholm.se

Xasuusqorka Daryeelka

Xasuusqorka Daryeelka waxuu waayeelka, qoyskooda iyo saaxiibadooda awoodsiinayaa inay baaraan sida daryeelka maalin walba loo wado. Xasuusqorka Daryeelka waxaa la bilaabay Noofambar, 2009.



District councils (Golayaasha Xaafadaha)


Waajibaadyada daryeelka waayeelka waxaa maamula Social Services Act (Sharuucda Adeega Bulshada), sidoo kale waxaa maamula Health and Medical Service Act (Sharuucda Adeegga Caafimaadka iyo Daawaynta) iyo Sharuucda Taageeridda & Adeegga Dadka qaba Naafanimu saamaynaysa.

Golaha Xaafad walba waxuu wakiil ka yahay daryeelka xaafadiisa. Sharci ahaan waa in xaafadahu u howlgalaan in ay xaqiijiyaan in waayeelku isku filnaansho iyo amaan gurigooda ugu noolaadan, iyaga oo ku nool nolol fir-fircoon oo micno leh, dadna weheshanaya.


XAQIIQOOYIN KU SAABSAN DARYEELKA WAAYEELKA

Qiyaastan oo laqaado sannad walba Janaayo.

Tirada dadka helaya daryeelka waayeelka




Tirada daryeel helayaasha dadka da'da kala duwan 2010




22 boqolkiiba dadka Stockholm dagan ee dhaafay 65 waxay helaan nooc ka mid ah daryeelada. Tirada dadka daryeelka hela waa uu kala duwan yahay marka da'da kala duwan la eego.

Dad aad ubadan ayaa dooranaya daryeelka ay shirkadaha madax-banaan ah bixiyaan



Magaalada Stockholm waxay kaligeed samayn kartaa adeeg dhan. Waxaa kale oo suurto gal ah adeeg heshiis ah, oo micnahiisu yahay in shirkad madax-banaan ay qabato howl dowladdu leedahay. Doorashada sadexaad waa shirkado madax-banaan, dowladda hoosena waxay ka gadanaysaa boosas iyo adeegyo ay shirkaddu leedahay.


Tirada daryeel helayaasha marka loo eego daryeelka ay helaan




Daryeelka guryaha lagu bixiyaa wuu sii badanayaa, laakiin tirada dadka guryaha xanaanada iyo daryeelka ku jira way sii yaraa sanadahiisoo lasoo dhaafay. Waxaa dheer daryeelka guryaha iyo guryaha dadka lagu xanaaneeyo, gunooyin lagu bixiyo xanaanada-guriga, daryeel lagu nasinayo dadka qofka waayeelka ah guriga ku haya, adeegyo wehel ah, daryeel wakhti-gaaban iyo nashaadaad maalintii. Mararka qaarkood noocyadaan kala duwan waa la isku daraa.

Daryeelka waayeelka iyo cida bixisa


Adeegyada daryeelka guriga caadiga ah



Adeegga daryeelka ee guryaha adeegyada leh



Guryaha xanaanada iyo daryeelka



ABC-da daryeelka waayeelka

Avlösning – Daryeelka dadka waayeelka guriga ku haya lagu nasiyo

Dadka qof guriga ku xanaaneeya waxay xaq u leeyahiin inay helaan nasin dhan 16 saac bil walba. Daryeelka nasinta waxaa sidoo kale loo samayn karaa sidii xanaano waqti gaaban ah.

Bistånd – Taageero

Waa caawinaad iyo taageero kale oo ay waayeelku ka dalban karaan nidaamka daryeelka waayeelka. Baahidda qofka codsanaya ayaa cayimaysa xaquuqda taageero, iyadoo lagu ogaanayo “qiimaynta caawinaadda -assistance assessment” Taageerada waayeelka waxaa ku jiri kara adeegyada daryeelka guriga dhexdiisa, adeegga wehelnimada, nashaadaadka maalintii ama guryaha xanaanada iyo daryeelka.

Biståndshandläggare – Sar-gaalka qaabilsan taageerada

Waa qofka qaabilsan inuu baaro oo qiimeeyo, go'aana uu kagaaro baahida taageeridda. La xariir golaha xaafadda si aad qiimayn u codsato.

Dagverksamhet – Nashaad-daadka maalintii

Fir-fircoonigalin iyo nashaadaad meelo kala duwan fiiri gaara siinaya.

Gruppboende – Hoy kooxeed

Guryaha xanaanaynta iyo daryeelka ee dadka hilmaanka (dementia) qaba.

Hemtjänst – Adeegyada daryeelka guriga dhexdiisa

Adeegyada daryeel ee guriga dhexdiisa ah waxaa loo bixiyaa iyadoo loo eegayo baahida qofka, waxaana ku jiri kara adeegyo iyo daryeelo kala duwan.

Hemvårdsbidrag – Gunada lagu bixiyo xanaanaynta-guriga.

Qofka uu guriga ku xanaaneeyo qof kale waxuu dalban karaa guno. Gunada waxaa la siiyaa dadka la xanaaneeyo, waxayna siinayaan dadka iyaga haya.

Korttidsvård – Daryeel waqti-gaaban

Waa gaynta guryaha xanaanada ama daryeelka muddo-gaaban ama waqti soo noq-noqda. Waxaa la isticmaali karaa si loo nasiyo dadka qof guriga ku xanaaneeya.

Profilboende – Guriyayn si-gaara loogu doortay

Waxaa loogu talagalay dadka qaba baahi xanaano iyo daryeel oo gaar ah u baahan, tusaale: Jirada Parkinson-ka

Seniorboende – Guryaha dadka waaweyn

Waa guryo leh qaybaha kulanka bulshada oo leh fursado wax lagu wada cuno, looguna talagalay dadka 65 iyo kawayn jira. Waxaa lagu helikaraa ijaar ahaan iyo ijaarte-gate (tenant-owner). Waxaa laga heli karaa iyadoo la marayo Adeegga Guriyaynta ee Magaalada Stockholm. Qof walba oo leh sababo caafimaad ama bulsho oo adag waxuu codsan karaa in Adeegga Guriyayntu mudnaan siiso. Guryaha dadka waaweyn waxaa sidoo kale sameeya shirkadaha guryaha iyo hay'ado kale.

Servicehus – Guryaha adeegyada leh

Alarmiga amaanka iyo helitaan shaqaale 24 saac maalintii. Qolalka waxaa loo hagaajiyay iyadoo laga fakarayo baahida qofka.

Sjukhem – Guryaha xanaanada

Waxaa loogu talagalay dadka waayeelka ah ee xanaano iyo daryeel saa'id ah ubaahan.

Trygghetsboende – Deegaan ammaan ah

Waa nooc cusub oo guriyayn ah oo la bilaabay 2010 oo leh alarmiga ammaanka, shaqaale, qaybo dadku ku kulmaan oo ku nashaadaad iyo fursado kale oo cunno lawada cuno.

Go'aanka ogolaanshaha dejinta looma baahna – qofwalba oo 70 iyo ka wayn jira waxuu gali karaa

liiska sugidda galo, laakiin waa inay 75 jiraan marka ay soo galayaan. Guryaha waxaa bixiya Howlaha Guriyaynta ee Magaalada Stockholm iyadoo fiirinaysa liiska sugitaanka, mudnaanta caafimaad iyo sababo xaalado bulsho.

Trygghetslarm – Alaarmiga ammaanka

Alaarmiga ammaanku waxay ku awoodsiinaysaa in aad si dhaqso ah xarunta gurmada ula xariirto.

Vaktmästarservice – Adeegga Caawiyaha Shaqada Guriga

Waa caawinaad dadka waayeelka ah laga caawinayo howlaha ayqabtaan ee khatarta ku noqon kara. Guri walba ee qof 75 iyo ka wayn jira waxaa la siinayaa 6 saacadood oo adeeg ah adeeg-guri ah sanadkii, oo bilaash ah.

Vård- och omsorgsboende – Guryaha xanaanada iyo daryeelka

Waa guryo xanaano, deegaan dadka waayeelka ah iyo hoy ay dad kala duwani dagan yahiiin. Guryaha xanaanada iyo daryeelka waxaa waqti walba jooga shaqaalaha daryeelka, iyada oo xanaano weheliso. Waxaa loo baahan yahay go'aan ogolaasho in qofka la dajiyo.

Älderdomshem – Guryo ay dagaan dadka waayeelka ah

Waa guryo xanaano iyo daryeel oo loogu talagalay dadka aan daryeel wayn u baahnayn, laakiin sababo badan dartood raba in shaqaale 24 saac agtooda joogo.

Äldreomsorgsinspektörer – Qofka baara daryeelka waayeelka

Baarayaasha daryeelka waayeelku waxay adeegga ku imtixaamaan iyagoo eegaya dadka isticmaala. Baarayaashu waxay eegayaan ni-daamyaha iyo fulinta, iyagoo eegaya kan dawladda hoose iyo kan shirkadaha madaxa-banaan, iyo waafajinta hadafyada siyaasad ahaan loo dajiyay iyo heerka tayo.

Golaha Xaafadaha (District councils)

Bromma

Gustavslundsvägen 151 G
Box 15017, 167 15 Bromma
Telefoonefoon: 08-508 06 000
E-mail: bromma@stockholm.se

Rinkeby-Kista

Borgarfjordsgatan 14
Box 7049, 164 07 Kista
Telefoon: 08-508 01 000
E-mail: rinkeby-kista@stockholm.se

Enskede-Årsta-Vantör

Slakthusplan 4
Box 81, 121 22 Johanneshov
Telefoon: 08-508 14 000
E-mail: eav@stockholm.se

Skarpnäck

Björkhagsplan 6
Box 5117, 121 17 Johanneshov
Telefoon: 08-508 15 000
E-mail: skarpnack@stockholm.se

Farsta

Storforsplan 36, plan 11
Box 113, 123 22 Farsta
Telefoon: 08-508 18 000
E-mail: farsta@stockholm.se

Skärholmen

Bodholmsplan 2
Box 503, 127 26 Skärholmen
Telefoon: 08-508 24 000
E-mail: skarholmen@stockholm.se

Hägersten-Liljeholmen

Telefoonefonvägen 30, plan 9
Box 490, 129 04 Hägersten
Telefoon: 08-508 22 000
E-mail: hagersten-liljeholmen@stockholm.se

Spånga-Tensta

Fagerstagatan 15
Box 4066, 163 04 Spånga
Telefoon: 08-508 03 000
E-mail: spanga-tensta@stockholm.se

Hässelby-Vällingby

Hässelby torg 20-22, våning 2
Box 3424, 165 23 Hässelby
Telefoon: 08-508 04 000
E-mail: hasselby-vallingby@stockholm.se

Södermalm

Medborgarplatsen 25
Box 4270, 102 66 Stockholm
Telefoon: 08-508 12 000
E-mail: soder@stockholm.se

Kungsholmen

S:t Eriksgatan 47 A
Box 49039, 100 28 Stockholm
Telefoon: 08-508 08 000
E-mail: kungsholmen@stockholm.se

Älvsjö

Älvsjö stationsplan 11
Box 48, 125 21 Älvsjö
Telefoon: 08-508 21 000
E-mail: alvsjostadsdelsnamnd@alvsjo.stockholm.se

Norrmalm

Tulegatan 13
Box 3128, 103 62 Stockholm
Telefoon: 08-508 09 000
E-mail: info@norrmalm.stockholm.se

Östermalm

Karlavägen 104, 6 tr
Box 24156, 104 51 Stockholm
Telefoon: 08-508 10 000
E-mail: registrator@ostermalm.stockholm.se

